# Hageyaasha Buuxbuuxinta Foomka Diwaan-galinta Cashuur-bixiyaha

Iyada oo la raacayo qodobada 35aad, 158aad iyo 169aad ee Xeerka Dakhliga Xeer Lr. 72/2016 iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Dakhliga 2017, dhammaan ganacsiyada oo ay ku jiraan loo-shaqeeyeyaasha iyo dadka dhulka leh waxa looga baahanyahay in ay is-diwaangaliyaan, helaanna lambarka aqoonsiga cashuur-bixiyaha.

Dhammaan dadka ay ku waajibtay cashuurtu waa in ay iska diwaan-galiyaan Waaxda Cashuuraha Berriga. Qaybta B7 ee hageyaashan ayaa sheegaysa noocyada cashuuraha la bixinayo, tilmaamaysana wakhtiga loo baahanyahay in aad is-diwaangaliso. Waaxda Cashuuraha Berriga ayaa bixin doonta tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan noocyada cashuuraha loo baahanyahay in la bixiyo.

Foomka ku haboon ayaa loo isticmaalayaa diwaan-galinta dadka cashuuruhu ku waajibeen ee ka shaqeeya Somaliland. Kuwan waxa ku jira hay'addaha looga baahanyahay in ay ka jaraan cashuurta dakhliga mushaharaadka ay siiyaan shaqaalahooda. Waxa jira foomam kala duwan oo ganacsiyada shakhsiga ah iyo kuwaan shakhsiga ahayn loogu talogalay. Ganacsiga shakhsiga ah waxa loola jeedaa midka aan shirkada ahayn ee qof kali ahi leeyahay, kaas oo buuxinaya foomka diwaangalinta cashuur-bixiyaha shakhsiga ah (Form 01-A). Ganacsiga aan shakhsiga ahayn waxa ku jira hay'addaha shakhsiyadda qaanuuneed leh sida shirkaddaha, shirkaddaha gaarka loo leeyahay, iskaashatooyinka, ururada, hay'addaha dawladda, ururada aan dawliga ahayn (NGOs), xafiisyada mashaariicda, hay'addaha caalamiga ah iyo dadka lamidka ah ee cashuurtu ku waajibtay. Wixii aan shakhsiyaad ahayni waxay soo buuxinayaan foomka diwaan-galinta cashuur-bixiyaha aan shakhsiga ahayn (Form 01-B). Tixraacyada hawlaha ganacsi, laamaha iwm waxay sidoo kale la xidhiidhaan noocyada kale ee hay'addaha sida Ururada aan Dawliga ahayn (NGOs), shirkaddaha iyo hay'addaha kale ee qabta shaqooyin cashuuri ku waajibtay.

Waxa lagaaga baahanyahay in aad is-diwaangaliso ka hor inta aanad bilaabin nooc kasta oo ganacsi ama shaqo kasta oo cashuuri ku waajibtay oo aad dalbato/codsato Lambarka Aqoonsiga Cashuurta (TIN), heshana Shahaadada Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha. Shahaadada Lambarka Aqoonsiga Cashuurtu waa lacag la'aan. Codsiga lagu dalbanayo Lambarka Aqoonsiga Cashuurta waxa loo soo gudbinayaa Xafiiska Diwaanglinta Waaxda Cashuuraha Berriga ee ku yaal Hargeysa ama Xafiiska Cashuurta heer Gobol ee kuugu dhaw.

Haddii aanad soo gudbin macluumaad sax ah, hanaanka diwaan-galintu wuu kaa habsaamin doonaa in aad hesho Shahaadada Lambarka Aqoonsiga Cashuurta, adeegyada kalena wakhti bay kugu qaadan. Haddii aad u baahato xog dheeraad ah fadlan la xidhiidh Waaxda Cashuuraha Berriga, Xafiiska Diwaangalinta Cashuur-bixiyaha ee Xarunta haddii uu ganacsigaagu yahay Hargeysa, booqo mareegta Wasaaradda Maaliyadda ee **slmof.org** ama kaalay xafiiska Cashuuraha Berriga heer Gobol ee kuugu dhaw. Waxa jira meelo foomka ah oo lagaaga baahanyahay in aad buuxiso. Calaamadi khaanadaha (boxes) buuxina meelaha qoraalka ee haboon.

**1. Ganacsiga shakshiga ah** – Waxay buuxinayaan foomka diwaangalinta cashuur-bixiyaha shakhsiga ah ee form 01-A.

**2. Ganacsiga aan shakhsiga ahayn** – Waxay buuxinayaan foomka diwaangalinta cashuur-bixiyaha aan shakhsiga ahayn ee form 01-B.

Buuxi dhammaan qaybaha iyo meelaha foomka ee loo baahanyahay. Calaamadda (*) waxay sheegaysaa meesha loo baahanyahay in la buuxiyo. Buuxi dhammaan meelaha qaybaha A iyo B ee ku qoran farta waaweyn, saxeex caddaynta qaybta C ee hoose kuna soo celi Xafiiska Diwaangalinta Cashuur-bixiyaha ee Xarunta Waaxda Cashuuraha Berriga ama Xafiiska Gobolka Waaxda Cashuuraha Berriga ee aad joogto iyada oo ay la socdaan qoraalada xoojinta ahi.

Foomka diwaangalinta waxa uu leeyahay saddexdan qaybood ee waaweyn:

## QAYBTA A – Ganacsiga jira ama cusub

Calaamadi khaanada la xidhiidha waxayna ku xidhantahay in aad doonayso diwaan-galinta ganacsi cusub ama shirkad bilaabaysa ganacsi ama shaqo cashuuri ku waajibtay, ama ganacsi hore u jiray oo aan hore loo diwaan-galin.

## QAYBTA B - Faahfaahinta iyo Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha

**B1 – Faahfaahin Guud:** Bixi faahfaahinta qofka la diwaan-galinayo. Haddii aad shakhsi tahay, hubi in aad magacyadaada si sax ah u qorto (magaca 1aad, magaca dhexe iyo magaca u danbeeya) iyo ciwaankaaga emailka. Haddii ay tahay diwaan-galin aan shakhi ahayn, bixi faahfaahinta iyo nooca hay'adda la diwaan-galinayo, magaca ganacsi ee ay ku diwaan-gashan tahay, nooca hay'adda iwm.

**B2 – Faahfaahinta Cidda lala xidhiidhayo.** Buuxi magaca iyo faahfaahinta qofka Waaxda Cashuuraha Berrigu kala xidhiidhayso arrimaha cashuurta oo ay ku jiraan emailka lagala xidhiidhayo iyo lambarka telfoonka. Faahfaahintani waa muhiim maadaama ay u ogolaanayso Waaxda Cashuuraha Berriga in ay kula soo xidhiidho haddii aad u hogaansami weydo waajibaadkaaga ganaax cashuureedna kugu waajibo. Buuxinta ciwaanka meesha xarunta u ah ganacsiga iyo sidoo kale emailka iyo telfoonka xarunta ayaa loo baahanyahay.

**B3 – Faahfaahinta la xidhiidha ganacsiga:** Haddii ganacsigaaga loo yaqaan magaca ganacsi aan ahayn magaca sharciga ah, gali magacaa meesha loo baneeyay. Sidoo kale sheeg faahfaahinta bangiga ganacsigaagu isticmaalo (haddii uu jiro), faaiidada dhabta ah ama aad qiyaastay ee sanadlaha ah, faahfaahinta kirada haddii ay jirto, tirada shaqaalaha iwm. Haddii aad shirkad tahay ama hay'ad la mid ah, qor faahfaahinta saamigaaga iyo saamiyada, sadexda saamiile ee ugu waaweyn magacyadooda, lambarada telfoonada ay isticmaalaan, magaalada ama waddanka saamiileyaashu deganyihiin iyo Lambarka Aqoonsiga Cashuurta haddii ay leeyihiin.

**B4 – Hawlaha Ganacsiga:** Sheeg hawlahaaga ganacsiga, nooca ganacsigaagu yahay, haddii ganacsigaagu uu qabto wax ka badan hal shaqo ganacsi waa in aad sheegtaa hawlahaa dheeraadka ah ee ganacsigaagu qabto.

**B5 – Laamaha Ganacsiga:** Sheeg laamaha ganacsigaaga ee Somaliland dhexdeeda iyo dibedeeda labadaba. Ku muuji ciwaanadooda iyo faahfaahinaha kaleba meelaha loo baneeyay.

**B6 – Xisaabaadka Baniga ee uu Isticmaalo Ganacsigu:** Sheeg faahfaahinta xisaabaadka bangiga ee ganacsiga.

**B7 – Noocyada Cashuurta la bixinayo:** Noocyada cashuuraha ay waajib tahay in la bixiyo oo ku salaysan noocyada shaqooyinka la qabto. U calaamadi khaanadaha la xidhiidha sidan soo socota:

- **Cashuurta dakhliga shaqada**: calaamadi khaanadan haddii naftaada ama shaqaale aad ka bixinayso cashuurta dakhliga ee ka dhalatay shaqada oo ay ku jiraan kuwan soo socdaa: wixii

guno ah, mushahar, lacagta fasaxa, mushaharka fasaxa, lacagta shaqada dheeraadka ah, ajuurada, khidmada, lacagta dhiirigalinta ah, lacagta dheeraadka ah ama lacagta safarka, madadaalada, adeegyada, kharashka nolosha, guriga, caafimaadka ama gunada kale..

- **Cashuurta dakhliga ganacsiga**: calaamadi khaanadan haddii ganacsigu yahay mid u diwaan-gashan shirkad ganacsi, Wakiil ama Sanduuq Hawlgab. Tan waxa sidoo kale buuxinaya dadka aan shakhsiga ahayn ee qaybta ka ah ganacsi la wada leeyahay.

- **Cashuurta dakhliga shakhsiga ah: (ganacsadaha kaliya)** calaamadi khaanadan haddii ganacsiga uu leeyahay isla markaana maamulo hal qof oo caadi ahi wax kala duwanaansho sharci oo u dhaxeeya mulkiilaha iyo ganacsiguna aanay jirin. Marka uu mulkiiluhu si toos ah gacanta ugu hayo dhammaan qaybaha ganacsiga masuulna ka yahay maaligalinta ganacsigan. Khaanadan waxa sidoo kale calaamadinaya dadka qaybta ka ah ganacsi la wada leeyahay.

- **Cashuurta dakhliga kirada** (ganacsiga shakhsiga ah oo kaliya): Calaamadi khaanadan haddii aad tahay shakhsi dakhli kiro oo kiraynta hanti maguurto ah ( dhul iyo dhismeyaal) ka yimid ku soo galo sanadkii.

- **Cashuurta laga jaro lacagaha saamiileyaasha degan dalka:** (Ganacsiyada aan shakhsiga ahayn): Calamaadi khaanadan haddii aa tahay shirkad ama hay'ad la mid ah oo lacag siisa saamiileyaal dalka degan.

- **Cashuuraha laga jaro lacagta la siiyo dadka aan dalka deganayn:** Calaamadi khaanadan haddii aad lacago siiso dad aan dalka Somaliland deganayn oo hela faaiido, saami faaiido, dakhliga faaiido qaybsiga khayraadka la soo saaro iwm ama qandaaraasyo ama adeegyo xirfadeed ama laga jaro dadka madadaaaliyeyaasha ah ama ciyaartoyda.

- **Cashuurta adeega iyo baddeecadda**: Calaamadi khaanadan haddii aad wax soo dajiso ama farsamayso/soo saarto baddeeco ama aad bixiso adeeg koronto, adeeg isgaadhsiineed, adeegyada biyaha, hoteelada, adeegyada rarka iyo dajinta, adeegyada hoteelada cuntada, iibinta tigidhada adeegyada gaadiidka caalamiga ah, adeegyada hay'addaha socdaalka ama adeegyada heshiisyada ciyaaraha oo dakhligaaga sanadkii kaa soo gala bixinta adeegyadan iyo baddeecaddahani uu leegyahay ama ka badanyahay shan (5) milyan oo Somaliland shilling ah.

- **Cashuurta xakamaynta**: Calaamadi khaanadan haddii aad soo dajiso ama soo-saarto ciida, dhagaxaanta iyo walxaha madcdanta ah: Buuriga iyo walxaha buuriga; qalabka laysku qurxiyo ( een ahayn saabuunta, dawada cadayga, waraaqaha musqusha iyo jeermis-dileyaasha); cabitaanka aan alkoholka ahayn; baabuurta raaxada ( ka badan 4,000 cc ama qiimahoodu ka badanyahay 20,000 $US); dahabka, dhagaxaanta qiimaha leh ama biraha qiimaha leh; ama bixiya adeegyo isgaadhsiineed.

## QAYBTA C – Ogolaanshaha shahaado siinta

Kadib marka aad buuxiso foomka xaqiiqsatana in xogta aad bixisay tahay mid sax ah, fadlan gali lambarka telfoonkaaga, meesha ogolaanshaha lagu sameeyay, saxeexna foomka si aad u muujisid in aad caddayn samaysay " waxan caddaynayaa in xogta aan ku sheegay codsigani tahay mid run ah oo sax ah". Caddayntani waxay u taagantahay balanqaadka qofka buuxinaya foomka. Fadlan xaqiiji in qofkii loo igmaday saxeexay caddaynta. Qofka loo igmaday waa mulkiilaha, danwadaagaha ama qof si shakhsi ah ay u igmatay hay'adda ama shirkaddu.

## QAYBTA D - Meesha loo reebay Maamulka Cashuurta

Go'aami qaybta cashuurta haboon.

Calaamadi Xarunta Cashuurta ee haboon.

Ku qor foomka Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee la siiyay.

Hubi wixii lifaaqyo ah ee la socda foomka diwaangalinta waxaanad ku ridaa faylka cashuur-bixiyaha.